**Loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah**

# Kaalmo dhaqaale oo ka socota CSN oo loogu tala galay waxbarashada dugsiga sare

Ma billaabeysaa dugsi sare? Markaas waxaad kaalmo dhaqaale ka heleysaa CSN, oo ah hey'adda dowladda ee gacanta ku haysa taageerada dhaqaale ee waxbarashada ee swiidhishka ah. Waxaa jira nuucyo kala duduwan oo kaalmooyin ah oo la codsan karo. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa sida ay wax yihiin marka la eego adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah

## Kaalmooyinka kala duwan ee CSN

Dhammaan kaalmooyinka lacageed waxaa inta ugu dheer la qaadan karaa ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sannadka aad buuxineysid 20. Markaas ka dib waxaad codsan kartaa kaalmo dhaqaale oo waxbarasho.

**Kaalmo dhaqaale oo waxbarasho**
Kaalmada dhaqaale ee waxbarasho waa 1250 koron bishiiba, waxaana caadi ahaan la dhiibayaa 10 bilood sannadkiiba, laga billaabo Sebteembar ilaa iyo Juun. Si aad u qaadatid kaalmada dhaqaale ee waxbarasho waa in aad buuxisay 16 sano, oo aad dhigataa waxbarasho dugsi sare.

**Wax dheeraad ah oo la isugu daro**
Haddii qoyskaagu ay leeyihiin dakhli ka hooseeya ilaa xad go'an waxaad codsan kartaa in aad heshid kaalmo dheeraad ah. Waxaa lagu magacaabaa wax dheeraad ah oo la isugu daro. Inta lacaga ee aad qaadaneysid waxay ku xirantahay qoyskaaga dakhligiisa.

**Waxa la isugu daro xagga deegaanka iyo safarka**
Waxa la isugu daro xagga deegaanka iyo safarku waa kaalmo dhaqaale oo loogu tala galay deegaanka iyo safarrada. Waxaad codsan kartaa haddii aad dhiganeysid dugsi sare oo xur ah ama dugsi shacbi ah, waan in aad degganaataa meel kale inta waxbarashadu socoto.
FG! Haddii aad dhiganeysid dugsi sare oo degmo waxaad kaalmada degaanka iyo safarrada ka dalbaneysaa degmadaada, CSN-ta beddelkeeda.

**Kaalmo dhaqaale oo farsamo-yaqaan farsamo ka barasho**
Gunno shaqo wax ku barasho waa kaalmo dhaqaale oo aad codsan kartid marka aad dhigatid waxbarasho dugsi sare oo shaqo wax ku barasho ama waxbarasho u eg shaqo shaqo wax ku barasho lagu qaadanayo barnaamij hor dhac ah. Waxaa loogu tala galay kharashaadka dheeraadka ah ee cuntada iyo safarrada aad geli kartid marka aad u baxaysid goobtaada shaqada.

**Ma dooneysaa in aad waxbadan sii ogaatid**
Gal bogga www.csn.se/studiehjalp ama naga soo wac 0771-276 000

CSN nr 1632H/1811/översättning av 1632A-1811

## Shuruudo gaar ah oo loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah

Marka aad tihid muwaadin ajnabi ah CSN waxaa ay ugu horreynta baareysaa in aad xaq u leedihid kaalmo waxbarasho oo swiidhish ah. Ka dibna waxaannu baareynaa haddii aad buuxisay shuruudaha kale si aad u heshid kaalmo dhaqaale, tusaale ahaan in aad waqti buuxa wax dhiganeysid.

Haddii aad sharci degganaansho oo joogto ah (PUT) leedahay, deggantihidna Swiidhan xaq baad badanaa u leedahay kaalmo dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Haddii aad Hey'adda qaxootiga ka heshay sharci degganaansho oo waqti go'an ah iyadoo ay sababtu tahay xaalad qaxootinnimo ama wax u eg xaq baad sidoo kale badanaa u leedahay taas. Laakiinse ka megengelyo doon ahaan xaq uma lihid taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah.

Haddii aadan haysan PUT ama aan lagaala mid dhigi karin qaxooti, waxaa jira sharciyo kala duwan oo taas khuseeya hadba haddii aad ka tihid EU/EES ama Switzerlandees ama haddii aad heysatid jinsiyad kale. Waxbadan waxaad ka akhrisan kartaa warqadda macluumaadka dhabta ah ee Svenskt studiestöd för studier i Sverige för dig som är utländsk medborgare "Taageerada dhaqaale ee loogu tala galay waxbarashada Swiidhan ee loogu tala galay adigaaga heysta dhalashada ajnabiga ah" (CSN nr 4146)

Warqadda macluumaadka dhabta ah oo ah luqada kala duwan waxay ku jirtaa www.csn.se

## Sidan ayaad u codsaneysaa

Adigaaga ah muwaadin ajnabi ah waa in aad codsataa kaalmo dhaqaale oo waxbarasho sanad dugsiyeed kasta. Taas waxaad ku sameyneysaa Ansökan om studiehjälp/Uppgifter för rätt till svenskt studiestöd "Codsi kaalmo caawimaad dhaqaale /Macluumaad ku aaddan xaq u lahaanshada taageero waxbarasho oo swiidhish ah" (Foomka CSN ee nambarkiisu yahay 4144).

Haddii aad u baahantahay wax dheeraad ah oo laguugu daro, wax la isugu daro oo loogu tala galay deegaan iyo safarro ama kaalmo dhaqaale ee farsamo-yaqaan farsamo ka barasho, waa in aad sidoo kale codsi u dirtaa CSN.

Dhammaan foomamka oo dhan waxay ku jiraan www.csn.se/blanketter

## Goormey lacagtu imaaneysaa?

Marka aad buuxisid 18 sano adiga naftirkaaga ayaa kaalmada helaya, intaas ka horna waxaa sida caadiga ah loo shubayaa lacagta waalidki markii ugu dambeeyay qaatay kaalmada carruurta. Haddii aad 18 sano ka yartahay oo aad Swiidhan waalid la'aan timiday qofka waalidka beddelkiisa xagga sharciga ku jira ayaa codsan kara in uu noqdo qofka loo shubayo lacagta.

Marka lacagta ugu horreysa ay imaaneyso waxay ku xirantahay maalinta aad buuxineysid 16 sano. Caadi ahaan ilaa iyo marka ugu horreysa ee lacagta CSN la dhiibayo waxaad Qasnadda ceymiska ka qaadaneysaa kaalmada carruurta.

CSN nr 1632H/1811/översättning av 1632A-1811

| Ma buuxineysaa 16 sano | Marka ugu horreysa ee la dhiibayo lacagta CSN-ta | Marka ugu dambeysa ee la dhiibayo lacagta Qasnadda ceymiska |
|---|---|---|
| Jannaayo-Juun | Sebteembar | Juun |
| Juun-Sebteembar | Oktoobar | Sebteembar |
| Oktoobar-Diseembar | Jannaayo | Diseembar |

Lacagta waxaa markaas ka dib la bixinayaa maalinta ugu dambeysa ee bilaha Sebteembar-Juun Lacagta kaalmada deegaanka iyo safarrada iyo kaalmada dhaqaale ee farsamo-yaqaan farsamo ka barashada waxaa la dhiibayaa Sebteembar-May.

## Maxaa dhacaya haddii aad dugsiga ka ma-maqnaatid?

Kaalmada dhaqaale waxaa loogu tala galay in aad awoodi kartid in aad wax baratid, sidaas darteed xaq uma lihid kaalmada haddii aad ma-maqnaaneysid. Ma-maqnaansho waxaa lagu tiriyaa maqnaanshada uusan dugsigu oggolaannin. Haddii uu dugsigu nagusoo wargeliyo in aad ma-maqnaaneysid waannu joojineynaa lacag bixinta. Haddii aad heshay lacag aadan xaq u lahaynna, waa in aad dib usoo dhiibtaa lacagtaas.

Ka fikir in ma-maqnaashadu ay xitaa saameyn karto kaalmooyin dhaqaale oo kale, tusaale ahaan kaalmada kirada guriga iyo waxa carruurta badan la isugu kordhiyo ee qoyskaaga.

*Ku soo dhawaw in aad nala soo xiriirtid haddii aad qabtid su'aalo, nasiib wanaagsanna xagga waxbarashadaada!*

CSN nr 1632H/1811/översättning av 1632A-1811